Somali

Tilmaamid Gunnada Guriyeynta Maxalliga ah

(A guide to Local Housing Allowance)

Warqaddan daabacani waxay sharxaysaa habka cusub ee loo xisaabiyo Dheefta Guriyeynta ugu saraysa ee aad heli karayso. Habka cusub waxa la yidhaa Gunnadda Guriyeynta Maxalliga ah (LHA). Habkani wuxu dhaqan-geli doonaa laga bilaabo 7da Abril, waana isku-mid meel kasta oo aad ku nooshahay. Haddii aanad garanayn Kawnsalka ay hoos timaado xaafadda aad ku nooshahay, waxad ka heli karaysaa biil-kaaga cashuurta kawnsalka.

Dib u habaysan 6 Apriil 2009

Waa maxay Dheefta Guriyeyntu?

Dheefta Guriyeyntu waxa weeye caawimaadda la siiyo dadka dakhligooda iyo lacagta kaydka ah ee ay haystaan hoosayso si ay ugu bixiyaan kiradooda. Waxay ku salaysan-tahay qiimayn lagu sameeyo dakhli-gaaga, kayd-kaaga dadka guriga kula degan. Xisaabintaasi waxa ku dhex-jira qadarka dheefta ugu saraysa ee aad awoodi karayso in aad hesho.

Waa maxay Gunnada Guriyeynta Maxalliga ahi?

Gunnada Guriyeynta Maxalliga ahi (LHA) waxa weeye habka cusub ee loo xisaabiyo Dheefta Guriyeynta ugu saraysa ee aad heli karayso. Qadarka lacagta aad helaysaa waxay weli ku xidhan-tahay dakhli-gaaga iyo kaydka aad haysato. Waxa weeye habka keliya ee aanu u xisaabino Dheefta Guriyeynta ugu saraysa ee aad heli karayso- taas oo isbedesha. Waxanu ku baahin doonaa heerarka (LHA) websaytdadyada.

Waa ayo cidda lagu dabaqayo (LHA)?

Cidkasta oo codsata Dheef Guriyeyn laga bilaabo 7da Abril 2008 , waxa loo xisaabin doonaa Dheeftooda Guriyeynta ayada oo la isticmaalayo (LHA). Haddii aad horeba u qaadan jirtay Dheef Guriyeyn, qawaaniintu isma bedeli doonto ilaa iyo inta cinwaan-kaagu isbedelayo ama adigu aad si meel-ku-gaadh ah u joojisay codsi-gaaga mooyaane.

Gunnada Guriyeynta Maxalliga ahi **kuma** saamaynaso haddii:

- aad ku nooshahay gui aanu anagu leenahay ama guri-kireeye maamul maxalli ah;
- aad guriga ka kiraysatay urur bulsheed maxalli diiwaan-gashan ah;
- aad ku nooshahay guryo la taakuleeyo;
- kiraysigaagu bilaamay ka hor 15 Janaayo 1989 (2 Janaayo 1989 Scotland);
- aad ku nooshahay karafaan, guri-doon ama hostel; ama
- Sarkaalka Kiradu go'aansaday in qayb weyn kirada aad ka bixiso kiraysi-gaaga lagu bixiyo cuntooyinka laguu kariyo.

Haddii aad tahay kooxa kor lagu sheegay midkood, waxa la sii wadi-doonaa in Dheefta Guriyeynta lagu xisaabiyo qawaaniinta hadda jirta.

Waxan horeba u qaataa Dheef Guriyeyn. Miyey dheeftaydu isbedeli doontaa?

Maya, dheeftaadu waxay ahaan doontaa sida ay iminka tahay. Hase yeeshe, haddii aad ka guurto guriga ama aad joojiso codsi-gaaga Dheef Guriyeyn ugu yaraan hal toddobaad, waxanu codsi-gaaga cusub ku xisaabin doonaa sida ay dhigayaan qawaaniinta (LHA).

Sidee ayaa (LHA) loo xisaabin doonaa?

Sakaalka Kirada ayaa inta aan wax kale la samayn dejin doona qadarka Dheefta Guriyeynta ugu saraysa ee aad heli karayso. Kuma xidhnaan doonto qadarka kirada aad bixiso. Qadarka ugu sareeyaa ee aad heli karaysaa wuxu la mid yahay inta ay helayaan cidkasta oo is-tiro leegtihiin oo ku nool deegaan-kaaga, inta ay doonto ha noqoto faraq u dhaxeeya dhab ahaan kirada aad bixiso iyo ta ay bixiyaan dadka guriga kale degani.

Meelaha suuqa kirada ballaadhan

Adeega kiradu wuxu wadanka u qaybiyey meelo suuq kiro ballaadhan (BRMAs). Meelahaasi oo ka kooban tiro xaafado ah. Waxa Meel kastaa jiri doonaa guryo nooc kastaba isugu jira oo ballaadhan oo masaafad maquul ah u jira adeeyada kala duwan ee ay dadweynahu u baahan-yihiin sida caafimaad, wax-barasho, raaxo, adeeg bangi iyo dukaanaysi.

Macluumaadka lasoo ururiyo, kirada meel dhexaadka u ah kirooyinka laga qaado xaafad kasta ayaa noqon doonta raqamka lagu isticmaalayo sicir goynta Gunnada Guriyeynta Maxalliga ah. Xaafad kastaa waxay yeelan doontaa siciro kala duwan oo ku salaysan tirada qolalka guri-degane-yaal kastaa u baahan-yihiin.

Adeega Kiradu waxay si joogto ah oo xeel dheer u daba-geli doonaan suuqa kirada maxalliga ah ka dibna waxay bilkasta casriyeyn doonaan raqamada Gunnada Guriyeynta Maxalliga ah ee u yaal Suuqa Kirada (BRMA). Waxa laga yaabaa in ay raqamadu kor ama hoos u dhacaan ama ay sidooda iska ahaadaan haddii aad codsi cusub samaynaysid.

Xafiiska Dheefta Guriyeynta ee ku yaal ayaa bilkasta la siin doonaa raqamadan. Waxad awoodi karaysaa in aad isticmaasho lambarka boostadaada si aad ku ogaato sicirka kiradu ka joogto xaafadda aad ku nooshahay (BRMA).

Tirada Qolalka

Waxanu go'aamin doonaa inta qol ee aad u baahan doonto, sida ay dhigayaan sharciyada Dheefta Guriyeyntu. Haddii aad ku nooshahay hal qol oo aad la wadaagto qalab dad kale (tusaale ahaan, madbakh ama musqul), waxa jira sicir Gunno Guriyeyn Maxalli ah oo u khaas ah. Waxad weliba helaysaa sicirkan haddii ay da'aadu ka yar-tahay 25 oo aad iskaa u nooshahay.

Haddii aanay adiga ku khusayn waxa kor ku yaal, waxanu u xisaabin doonaa tirada qololka sida hoos lagu muujiyey.

Hal qol-hurdo midkasta kuwa soo socda.

- Laba is-qaba
- Qof ay da'diisu tahay 16 jir ama ay ka weyn-tahay
- Laba caruura oo isku jinsi ah ilaa iyo inta noqona-yaan 16 jir
- Laba caruura oo ka yar 10 jir
- Ilmo (qof ka yar 16 jir)

Qofkasta waxa lagu tirinayaa mar keliya, kooxda ugu horaysa ee ay ku dhacaan.

Ma tirino qofkasta oo guriga wada-gashaan marka aanu xisaabinayno tirada inta qol ee aad u baahan-tahay. Waxanu tirinaa adiga iyo cidda aydu is-qabtaan, iyo sidookale wixii caruur ama dad dhallin-yar aad ka mas'uul tahay. Haddii ay jiraan dad waaweyn oo kale oo aan ahayn qaar kharashka cuntada laga bixiyo ama qof qol guriga kiro ka bixiya, sidookale waanu tirinaa. Hase-yeeshe, ma tirino caruurta la korsado ama wada-jir u kirayste-yaasha.

Muxuu yahay sicirka laygu dabaqayaa?

Dheefta Guriyeynta ugu saraysa ee aad helaysaa waxa weeye sicirka Gunnada Guriyeynta Maxalliga ah (LHA) ee tirada qolalka aad u baahan-tahay ka joogaan suuqa kirada xaafadda aad ku nooshahay.

Laga bilaabo 6 Apriil 2009, Housing Benefitka ugu **badan** ee aad heli kartid ah waa guri shan-qol hurdo leh ee qiimaha Lacagta Guriga. Haddii aad codsasho arji cusub u samaysatid Housing Benefit ama aad u guurtid guri kiro ah wixii ka dambeeya 6 Apriil 2009, waxaa codsashadaada loo qiimaynayaa sida guri shan-qol hurdo leh ee qiimaha Lacagta Guriga ee meesha aad degan tahay.

Haddii aadba qaadatid Housing Benefit ee qiimaha LHA ilaa lix iyo wixii ka badan oo qolal hurdo ah, waxaa kuu soconaya qiimahaa ilaa iyo inta kayskaaga dib loo eegi doono. Haddii ay xaaladaada waxba iska badelin, waxaa dib loo eegi doonaa hal sanno kadib markii aad codsatey Housing Benefitka ama sannad kadib dib u eegistii ugu dambaysay. Dib u eegista kadib, waxaa laga yaabaa inuu Housing Benefitkaagu kuu sii socon doono ilaa iyo 26 isbuucood ee kan hadda

haysatid qiimaha Lacagta Quriga. Waxaa codsigaaga dib loogu eegi doonaa sida shanta –qol hurdo ee qiimaha Lacagta guryaha ee xaafadaada.

Adeega Kirada ayaa baahin doonaa siciro (LHA) cusub bilkasta. Sicirka lagugu dabaqayaa wuxu ku xidhan-yahay taariikhda aad dalbatay. Taas oo sida caadiga noqon doonta taariikhda aanu helnay foomka codsi-gaaga ama taariikhda ugu horaysa ee aad codsatay Dheef Guriyeyn, haddii aad ku soo celiso foomka codsiga muddo bil gudeheed ah laga bilaabo taariikhdaasi. Waxaba kuma jiraan haddii taariikhda aanu bixinaynaa Dheeftaada Guriyeynta ay tahay bisha ku xigta, waayo dheeftaadu waxay weli ku salaysnaan doontaa sicirka lagu dabaqay markii aad soo codsatay.

Kiradaydu waxay ka saraysaa Gunnada Guriyeynta Maxalliga ah.

Dheefta ugu saraysa ee aad heli doontaa waxa weeye sicirka Gunnada Guriyeynta Maxalliga ahi (LHA) ka taagan-tahay xaafad-daada bisha aad codsatay ee loogu talo-galay inta ay leeg-yihiin dadka ayadu guriga wada-gashaan. Haddii ay kiradaadu ka badan-tahay raqamkaasi, adiga ay ka mas'uul ah in aad buuxiso wixii ka dhiman. Haddii ay ku haystaan duruufo khaas ahi, waxad akhrisata warqadda daabacan ee la magac baxday 'Go'aan-qaadasho Lacag-bixin Guriyeyn' ama nala soo hadal.

Kirada aan bixiyaa waxay ka yar-tahay Gunnada Guriyeynta Maxalliga ah.

Dheeftaada Guriyeynta ugu saraysaa waxa weeye kirada aad bixiso, oo lagu daro ilaa iyo £15 toddobaadkii. Taas oo ah qadraka ugu sareeya ee ay Dawladdu go'aansatay in lagu isticmaalo xisaabinta Dheefta Guriyeynta. Dheeftaada Guriyeynta ugu saraysaa kama badan karayso sicirka Gunnada Guriyeynta Maxalliga ah (LHA).

Tusaale
Kiro = £90 toddobaadkii
LHA = £120 toddobaadkii
Dheefta Guriyeynta ugu Saraysa = £105 toddobaadkii

Tusaale
Kiro = £90 toddobaadkii
LHA = £100 toddobaadkii
= £100 toddobaadkii

Haddii ay kiradaydu korodho, miyey kordheysaa Dheeftayda Guriyeynta?

Waxanu dib u-hubin doonaa sicirta Gunnadaada Guriyeynta Maxalliga ah (LHA) sannad guurada ka soo wareegta maalintii aad codsatay. Waxay markaasi Dheeftaada Guriyeyntu ugu saraysaa noqon doontaa sicirka ay bishaasi joogto Gunnada Guriyeynta Maxalliga ahi, taasi macneheedu wuxu noqon karayaa in ay dheeftaadu kordhayso. Dheeftaada Guriyeynta ee u saraysaa ma kordhi doonto haddii ay kiradaadu korodho.

Waxan dalbaday in codsigayga taariikh hore dib loogu dhigo. Waa maxay sicirka Gunnada Guriyeynta Maxalliga ah ee lagu salaynayaa?

Taasi waxay ku xidhan-tahay haddii aad dalbatay in codsi-gaaga dib loogu dhigo taariikh ka horaysa 7da Abril 2008 iyo haddii kale.

Haddii aanu go'aansano in aanu codsi-gaaga dib ugu dhigno taariikh ka horaysa 7da Abril 2008, waxanu codsi-gaaga ku sifeyn doonaa in taariikhda aad dalbatay ay ka horaysay fulinta qawaaniinta Gunnada Guriyeynta Maxalliga ah. Sidaasi darteed, Dheeftaada Guriyeynta ugu saraysaa waxay ku xidhnaan doontaa go'aanka uu gaadho Sarkaalka Kiradu. Waxa la bedelayaa

Gunnada Guriyeynta maxalliga ah (LHA) marka aad guurto ama haddii aad joojiso gunnada aad qaadato ka dibna aad markale dib u biloowdo.

Haddii aad dalbatay in codsi-gaaga dib loogu dhigo taariikh ka horaysa 7da Abril 2008 oo aanu taasi kaa ogolaano, sicirka gunnadaada Guriyeynta maxalliga ahi (LHA) wuxu ku salaysnaan doonaa raqamada khuseeya bisha aad codsatay in dalab-kaaga laga bilaabo. Waxa laga yaabaa in ay raqamadaasi ka duwan-yihiin kuwa bishii aad codsi-gaaga soo gudbisay. Waxanu dib u-hubin doonaa sicirta Gunnadaada Guriyeynta Maxalliga ah (LHA) sannad guurada ka soo wareegta maalintii aad codsatay.

Waxan doonayaa in Dheeftayda Guriyeynta la siiyo cidda aan guriga ka kiraystay. Taasi suurta-gal ma tahay?

Sida uu dhigayo sharciga Gunnada Guriyeynta Maxalliga ahi (LHA), Dheeftaada Guriyeynta toos ayaa adiga laguu siinayaa, waxana lagu shubayaa xiaabta bangi-gaaga ama jeeg ayaa ahaan ayaa lagugu siinayaa. Adiga ayaa ka mas'uul ah in aad siiso qadarka lacagta kirada ah cidda guriga kaa kiraysay waqtiga ku haboon. Waxa jira waqtiyo aad u yar oo aanu dheeftaada toos u siino kireeya-haaga. Waxanu taasi samaynaa oo keliya haddii aanu u malaynayno in ay dhibaato kaa haysato maamulidda kiradaada, haddii aad kirada la daahdo sideed todobaad ama wax ka badan, ama haddii aanu u malaynayno in aad adigu kirada iska bixiso. Xaalad kasta goonideeda ayaanu go'aan uga gaadhnaa,waxana laga yaabaa in aanu kaa codsano in aad noo keento sababo iyo caddayn aad noogu sheegayso waxa aanu u siinayno guri kireeyaha. Haddii aad u baahan-tahay in taasi caawimaad dheeraad ah lagaa siiyo, nala soo xidhiidh ama waxad la xidhiidhaa xafiiska talo-siinta muwaadiniinta.

Ma lihi xisaab bangi.

Haddii aanad lahayn xisaab bangi, waxanu lacagta Dheefta Guriyeynta kugu siin doonaa Jeeg inkasta oo aanu doorbidayno in aanu ku bixino xisaab bangi, waayo ayada ayaa ka ammaan ah kana wax-tar badan. Anaga ama xafiiska talo-siinta muwaadiniinta ayaa ku siin karayaa talo iyo macluumaad ku saabsan sida aad xisaab bangiga uga furanayso. Ka dibna waxad samaysan karaysaa amar-siin joogto ah oo bangi-gaagu cidda guriga kaa kiraysay ku siinayo kirada. Taasi waxa weeye dariiqo fudud oo aad ku hubinayso in kiradaada la bixiyo bilkasta.

Waxan u guurayaa guri cusub. Sidee ayaan ku ogaan karayaa Dheeftayda Guriyeynta ugu saraysaa inta tahay?

Waxad u baahan-tahay in aad ogaato sicirada Gunnada Guriyeynta Maxalliga ah (LHA) ee kirada suuqa balladahn ee aad raadinayso in aad u guurto. Waxanu ku haynaa macluumaadkan xaafisyadayada ama websayt-kayaga.

Intaasi ka dib waxad u baahan-tahay in aad xisaabiso tirada inta qolal-hurdo ee dadka guriga kula galaa u baahan-yihiin, taas oo ku salaysan shuruudaha qaybta 'Tirada Qolalka'. Taasi maaha tirada qolalka gurigu leeyahay, laakiin waxa weeye tirada dadka guriga kula gala ay u baahan-yihiin. Sicirka Gunnada Guriyeynta Maxalliga ahi (LHA) ee tirada qolalka kirada sicirka suuqa xaafadda ayaa ah Dheefta Guriyeynta ugu saraysa ee aad helayso, kiradu waxa ay doonto ha noqotee.

Markaa aad guriga ka guurto, ayaa lagugu dabaqaya (LHA) ga guriga cusub.

Maxa waxa weeye in aan weli idiin soo sheego wixii ku saabsan dhammaan dakhligayga iyo kayd-kayga?

Haa, habka aanu xisaabino Dheefta Guriyeynta anaga oo isticmaalayna dakhli-gaaga iyo kayd-kaagu isma bedalayo. Si aad ku ogaato macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan sida aanu u xisaabino Dheefta Guriyeynta, waxad eegta warqadda daabacan ee la magac baxaday 'Caawimaad laga siinayo Kirada iyo Cashuurta Kawnsalka Dadka Da' Shaqaynaysa ah' ama

’Caawimaad laga siinayo Kirada iyo Cashuurta Kawnsalka Hawl-gabe-yaasha‘. Waxa keliya ee isbedelayaa waxa weeye habka aanu u xisaabino Dheefta Guriyeynta u saraysa. Waxa weli loo baahan-yahay in aad tafaasiil naga siiso dakhli-gaaga iyo lacagta kaydka ah ee aad haysato, waxanad noo soo sheegtaa haddii wax isbedeli ku yimaado duruufa-haaga.

Waxa isbedelay tirada dadka aanu guriga wada-galno. Maxaa ku dhacaya Dheeftayda Guriyeynta?

Haddii qof ku soo biiro ama uu ka baxo guriga, waa in aad noo soo sheegto. Markaasi waxanu u bedeli doonaa Dheeftaada Guriyeynta ugu saraysa sicirka Gunnada Guriyeynta Maxalliga saxa ah (LHA) taas oo ah tirada cusub ee dadka guriga wada-gashaan.

Haddii qof guriga wada-gashaan sannad guurada dhalashadiisu saamayn ku yeelanayso sicirka (LHA) (tusaale ahaan, marka uu ilmuhu gaadho16 jir), waxa laga yaabaa in loo baahan-yahay in aanu wax ka bedelno (LHA)ga waayo waxa laga yaabaa in uu ilmuhu u baahan-yahay qol dheeraad ah. (waxad eegtaa qaybta kor ee ‘Tirada qolalka’).

Haddii aanan waafaqsanayn sicirka Gunnada Guriyeynta Maxalliga ah. Rafcaan ma qaadan karayaa?

Maya, rafcaan lagama qaadan karayo sicirka Gunnada Guriyeynta Maxalliga ah (LHA). Sababta oo ah heerka waxa loo dejiyey gebi ahaan sicirka Kirada Suuqa Xaafad-daasi (BRMA) oo wixii isbedel ahi wuxu saamayn ku yeelanayaa dad raalli ka ah sicirka.

Halkee ayaan ka heli kaayaa talo dheeraad ah?

Haddii aad u baahan-tahay cawimaad dheeraad ah ama talo, waxad la xidhiidhaa kawnsalka ku yaal deegaan-kaaga. (waxad ka heli karaysaa magaca kawnsalka ku yaal deegaan-kaaga xaashadda biilka ee aad ku bixiso cashuurta kawnsalka.)

Waxa kale oo aad cawimaad dheeraad ah ka heli karaysaa websaydada soo socda.

www.dwp.gov.uk – Waaxada Shaqada iyo Hawl-gabka

www.therentservice.gov.uk – Adeega Kirada

www.adviceguide.org.uk – Xafiiska Talo-siinta Muwaadiniinta

Talo Madax-bannaan

Haddii aad u baahan-tahay talo madax-bannaan, waxad la xidhiidhaa Xafiiska Talo-siinta Muwaadiniinta ee ku yaal deegaan-kaaga. Waxad ka heli karaysaa tilifoonadooda (iyo lambarada wakiilada talo-bixinta kale ee deegaanka) Buuga Tilifoonka iyo maktabada deegaanka, ama adiga oo la xidhiidhaya kawnsalka ku yaal deegaan-kaaga.

Qaabab kale

Waxad ku heli karaysaa macluumaadka ku yaal buugan-yar far waaweyn, far Indhoole, werin cajalad la dhegaysto ah iyo luqado kale. Wixii macluumaad dheeraad booqo websayt-kayaga www.benefit-leaflets.org for more information.